

Gawracato, teetano iyo xiiqdheer



Gawracato, teetano, iyo xiiqdheer waa seddax cudur oo khatar ah, laakin tallaalka ayaa kaa ilaalinaya. Haddii uusan tallaalka jirin dad badan ayey cudurradani ku dhici lahaayeen.

Gawracato waa infekshin dhuunta ku dhaca. Cudurku wuxuu qofka gaarsiin karaa dhaawac aad u culus oo ah xagga wadnaha, kilyaha iyo nidaamka neerfayaasha, waana loo dhiman karaa xitaa cudurka. Cudurku wuxuu dadka kale kula faafi karaa dhareerka, tusaale ahaan haddii caagad biyo la wadaago ama aad leesugu dhawaado.

Teetanada waxaa keena bakteeriyo jirka ka geli karta tusaale ahaan dhaawac wasakh ah ama qaniinyo bahal. Teetanadu waxay sababta muruqroor, waana wax nolosha khatar ku ah. Cudurka dadka isma qaadsiiyaan.

Xiiqdheertu waxay sababta qufac dheer oo xoog leh oo lama filaan ah. Cudurka aad buu khatar ugu sii yahay carruurta yar-yar, noloshooda ayeyna xiiqdheertu khatar gelin kartaa. Waxaa cudurkan dadka kale lagu qaadsiiin karaa dhibcaha yar-yar ee ka soo baxaya qofka buka marka uu qufaco ama hindhiso.

Waxaa loo baahanyahay dhawr khiyaas
Fasalka 8 ama 9 ayaa laysku siiyaa khiyaasta shanaad ee tallaallada ka dhanka ah teetanada, gawracatada, iyo xiiqdheerta. Dadka waaweyn waxay u baahanyihiin in ay 20:ki sanaba mar is tallaalaan si uu difaacoodu u sii jiryo.

Dhammaan tallaallada aad ka qaadaneysid laamaha caafimaadka carruurta iyo caafimaadka ardaydu maaha kuwo khasab ah waana lacag la'aan.

Ma dooneysaa inaad wax dheeraad ah ka ogaato?

Waxaad mar walba la hadli kartaa kalkaalisadaada caafimaadka iskuulka haddii aad qabtid wax su'aalo ah. Waxaad xitaa wixi dheeraad ah ka akhrisan kartaa:

- 1177.se
- Folkhalsomyndigheten.se

SIDAN AYUU TALLAALKU U DHACAYAA

Tallaalka kahor

Haddii aad qabtid su'aalo ku aaddan tallaalka waxaad la hadli kartaa qof weyn oo qoyskaaga ka mid ah ama kalkaalisada caafimaadka iskuulka. Haddii aad rabtid waxaad sidoo kale booqashada u soo wadan kartaa qof qaangaar ah.

Tallaalka

Kalkaalisoo caafimaad ayaa tallaalka ku siineysa. Waxaa laga tallaalaya cududda.

Tallaalka kadib

Dadka badankoodu waxba ma dareemaan tallaalka kadib ama waxaa keliya yara damqata meeshi cirbadda looga muday. Qaarna waxaa qaban karta qandho iyo murqaha gacmaha oo xanuuna. Gebi ahaanba waa wax aan khatar ahayn oo dhawr maalin gudohood iska dhammaanaya. Haddii aad wax uun ka welweshid tallaalka kadib waxaad adigu ama waalidkaa la xiriiri kartaan kalkaalisadaada caafimaadka iskuulkama laamaha caafimaadka.

BARNAAMIJKA TALLAALKA EE ISWIIDHAN

Halkan waxaad ka aqrisan kartaa tallaalka lagu casuumo dhammaan carruurta ku nool dalka Iswiidhan si looga hortago cudurada khatarta ah.

